

Tallaallada COVID-19: WAXA AY OGAANAYAAN WAALIDKA IYO MASUULKA

(COVID-19 Vaccines: WHAT PARENTS AND GUARDIANS SHOULD KNOW)

Tallaalka COVID-19 ilmaha wuu u fiican yahay ee dhib uma geysto.

Carruuro ka badan malaayiin ayaa qaatay tallaalka COVID-19. Tallaalka COVID-19 ee la isticmaalayo waxaa la soo mariyey tijaabooyin badan oo lagu soo xaqiijiyey iyo shuruudo la mid ah sida tallaallada kale ee lagu qaato dalka Mareykanka. Dad aad u yar ayaa tallaalka ka soo sheegtay waxyeello sahlan. Xaqiiqadii, dadku waxay u badan yihiin in ay saameyn daran kala kulmi doonaan mustaqbalkooda dambe marka uu ku dhaco COVID-19.



Caruuraha mar hore laga tallaalay COVID-19 waa in la siiyo tallaallo xoojin ah.

Qaadashada tallaalku waa difaac muhiim ah oo qof kasta ayaa u baahan, xataa dadkii mar hore qaatay COVID-19. Carruurta waxay sugi karaan saddex bilood ka dib marka la qaadsiiyo xanuunka ama marka ay si kale u xanuunsadaan iyagoo sii wadan lahaa tallaallada COVID-19. Tallaallada COVID-19 waxaa laga helaa difaac dheeraad ah oo waxaa yaraanaya in uu faayrusku dadka ku sii faafo, gaar ahaan dadka u nugul.

Qaadashada tallaalka waxa uu carruurta ka difaacayaa COVID-19.

Ma jirto si loo sii ogaan karo sida ay carruurta ugu xanuunsan karto COVID-19. Carruurta caafimaadka qabta ee aan qabin xaalado caafimaad ayaa si aad ugu xanuunsan kara. **Marka la wada tallaalo, ilmaha kasta ayaa difaac ka haysan doona xanuunka faafaya.**

COVID muddo dheer ah ilmaha wuxuu keenaa calaamado cusub, oo ku soo noqnoqda, ama joogto ah sida maskaxda oo caad ka fuulo iyo daal badan. Mid ka mid ah sida ugu fiican ee carruurta looga difaaco **saameynta fog ee COVID-19 ee ku soo bixi karta mustaqbalka** waa in laga sii tallaalo.



Carruurta waxaa la siiyaa tallaalka COVID-19 nooc ka awood yar kan dhalinyarada.

Qiyaasta tallaalka COVID-19 waxay ku saleysan tahay **da'da lagu jiro maalinta tallaalka la qaadanayo**, balse kuma xirna weyninka iyo miisaanka ilmaha. Waa sida tallaallada kale ee sida caadiga ah loo qaato, sida cagaarshowga A iyo cagaarshowga B. Carruurta waxay qaadan karaan **tallaallada kale isla maalinta ay qaadanayaan tallaalka COVID-19.**



Ka eego [Vaccines.gov](https://www.vaccines.gov) ama soo garaac 211 si aad u hesho goobta ay ilmaha ku soo tallaali karto. Tallaalku bilaash ayuu u yahay qof kasta, la iskama rabo aqoonsi ama ceymiska caafimaadka. Goobaha tallaalka qaarkood waxay u baahan yihiin waalidku in ay joogaan tallaalka COVID-19, laakiin qaarkood ayaa aqbalaya oggolaansho ah qoraal ama amar afka ah (sida taleefanka).

Iska hubi in ay ilmahaagu wada qaataan tallaallada la iska rabo ee COVID-19!

Carruurta gaartay 6 bilood ilaa 4 jir:

Moderna ama Pfizer



Caddeynta ah Qaadashada: Laba toddobaad ka dib tallaalka saddexaad ee Pfizer ama isla marka la qaato tallaalka xoojiyaha ah ee Moderna. Carruurta gaartay 6 bilood ilaa 4 jir waa in ay qaataan saddex jeer oo ah hal nooc oo tallaal.

Carruurta gaartay 5 ilaa 11 jir


Moderna ama Pfizer



Wada qaatay: Isla markiiba ka dib marka la qaato hal xoojiye oo cusub

Carruurta gaartay ama ka weyn 12 jir

Moderna, Novavax, ama Pfizer



Wada qaatay: Isla markiiba ka dib marka la qaato hal xoojiye oo cusub



Ma jiro tallaal dadkoo dhan u noqon kara 100% waxtar dhab ah, sidaas awgeed ayey dhacdaa in xanuunka la sii qaadsiin karo dad aad u yar oo qaatay tallaalladii laga rabay ee COVID-19. Tallaalka cusub ee COVID-19 waxaa la soo xaqiijiyaa in uu **si fiican u shaqeeyo oo uu ka hortago xanuunka daran ee COVID-19, seexashada isbitaalka, iyo in loo dhinto.**

Carruurta uu difaacoodu yahay daciifka waxa laga yaabaa in ay u baahdaan tallaal dheeraad ah. Faahfaahinta tallaallada COVID-19 iyo waxa aad filan karto marka ilmaha lagu tallaalo ka eego: www.dhs.wi.gov/covid-19/vaccine.htm